akhlaaqdeeda wanaagsan waxay ku xirantahay waxbarashadeeda, deegaanka, iyo reerkeeda, ee ma aha mid ka imaada in qayb ka mid ah jirkeeda la jaray.

### 3. Waxay ilaalisaa bikranimada

Gaar ahaan marxaladda saddexaad ee gudniinka ee nooca loo yaqaano fircooniga ee laga tago duleel yar oo kaadida iyo caadada ka baxaan, ayaa ah sababat loo sameyo si loo ilaaliyo bikradnimada gabadha ilaa guurka. Si kastaba ha ahaatee, qeybta kore ee xubinta ee la tolayo iyo qeybta bikarda ee xubinta way kala duwanyihiin.

### 4. Waxay ka caawisaa inay ilaashato quruxdeeda

Haddii naagta aan la gudin, caarada xubinka taranka ayaa sii korayso oo tani waxay ka dhigaysaa mid aad u fool xun. Gudniinka dhibatadan kali ah uma ahin daawo laakiin waa il qurux badan. Waa hadal been ah oo aan cadeyn lahayn in la dhaha hadii aan gabdha la gudin caarada xubinka taranka ayaa sii korayo. Gudniinka wax faaido oo aan xanuun aheyn oo uu u horsedo gabdhaha ma jiro.

### 5. Gudniinka dumarka marka laga eego dhinaca diinta

Gudniinka Gabdhaha (FGM) ayaa dalkeenna looga dhaqanaayay sannado badan, isaga oo ku tiirsan dhaqanka iyo diinta. Si kastaba ha ahata ee, culumada diinta waxay xaqiijiyeen in Qur'aanka ama Xadiista Nabiga Muxammed (NNKHA) midna aan waxba ka qorin Gudniinka Gabdhaha.

Sida laga soo xigtay hay'ada Caafimaadka Adduunka (WHO), gudniinku wuxuu ka billowday Masar qadiimiga 1,000 sano ka hor diinta Islaamka iyo Kiristaanka oo Sidaa darteed, quraankana kuma so aroorin oo Nebi Muxammad (NNKHA) wax amar ah kama bixin in uu ka hadlay oo kali ah moyee.

Gudniinka Gabdhaha loogama dhaqdo Bariga Dhexe, oo ah halka uu ka soo jeedo Islaamka, sida Sucuudiga, Suuriya, Lubnaan, Iran, iyo Indonesia, Liibiya, Marooko, iyo Aljeeriya, halkaas oo ay ku nool yihiin in ka badan 260 milyan oo Muslimiin ah. Ma jirto sabab dalkeena uu ugu hirgalo marka laga reebo wacyigelin iyo xog la'aan. Miyaan wax nagala weydiineyn in aan dhahno xubin aan faa'ido laheyn ayuu ilahey jirkeena ku abuuray oo aan jarno?

## Gudniinka Gabdhaha marka laga eego xagga sharciga iyo xuquuqda aadanaha

Mudo badan ayaa qof kasta oo bartay ama fahmay saamaynta gudniinka gabdhaha (FGM) ku leeyahay arrimaha caafimaadka iyo xuquuqda aadanaha ayuu ka soo horjeestay. Khaas ahaan, 1993 Shirkii Vienna ee Xuquuqda Aadanaha; Shirkii Caalamiga ahaa ee Dadka iyo Horumarka 1994 ee Qaahira; Shirkii Caalamiga ahaa ee Haweenka 1995 ee ka dhacay Beijing, waxaa si wadajir ah loogu heshiiyey in laga fogaado gudniinka gabdhaha. Falkaas waa la cambaareeyay.

Dalkeenna, Itoobiya ayaa wuxuu aqbalay heshiisyada caalamiga ah, sida ku cad xeerka qoyska ee dhowaan dib loo habeeyay iyo siyaasadaha haweenka iyo carruurta falka waa ciqaab haddii uu waxyeello u geysto muwaadiniinta oo lagu sameeyo iyaga oo aan raalli ka ahayn.

Sidaa darteed, maadaam gudniinka uu yahay mid qasab ah oo gabdhaha lo geysto inta u dhexeysa dhalashada ilaa iyo arooska oo aay xanuunkooda ku muujiyaan oohin oo kali ah waa in la joojiyaa oo laga hortagaa.

Gudniinka gabdhaha waxaa la muujiyey inuu waxtar lahayn keliya oo uu keeno cafimaad daro marka dhammaan qaybaha bulshada, ururada dawliga ah iyo kuwa aan dawliga ahayn, waa in ay yeeshaan isfahan guud oo ay wax ka qabtaan. Cidii awoodo ee sida hooyooyinka gudniinka, gaar ahaan kuwa dhibka la kulma oo carruurtooda ku riixaya inay ku dhacaan masiibadan oo kale, waa inay fahmaan halista gudniinka oo ay ka fogaadaan. Culumaa'udiinka, odayaasha, hoggaamiyayaasha qabaa'ilka, iyo guud ahaan dhallinyarada, iyo bulshada, waa in ay hormuud ka noqdaan wacyi-gelinta iyo abaabulka dadweynaha si ay qeyb ugu noqdaan ciribtirka gudniinka gabdhaha.

Aan manta go'aan gaarno si aan uugu hortagno gudniinka gabdhaha oo ah kii horseeday masiibadii ku dhacaday Madina iyo waxyeelloyin kale ee lamidka ah ee qabsada haweenka ee la caadeystay.

Haddii aad jeceshahay in aad hesho warside, ama aad hayso wax faallo ama su'aalo ah, waxaad nagala soo xiriiri kartaa cinwaanka soo socda.

**POPULATION MEDIA CENTER**
B.o.Box 672
Tel: 0115520990/0115522690
E-mail: pmc@ethionet.et

# "Gudniinka gabdha gabadhayda waan kaiilaalin!"



Save the Children

POPULATION MEDIA CENTER
Acting for Change

## Waxyeelada Gudniinka Gabdhaha

Gabdhaha yar-yar iyo kuwa dhalinyaro ah oo badan ayaa xubinta taranka laga jaray taas oo ka dhalatay fikradaha qaldan iyo rabitaanka waalidkood. Dhanka kale, waxaa taa ka sii daran  waa la jeex-jeexayaa oo la tolayaa, oo waxay u horseedeysaa silica iyo dhimashadaba . Hadii ay ka bad'baadan dhimashadda ayaa waxa muqata inay halis ugu jiraan walbahaarka iyo cafimaad daro oo halis ku ah noolashooda.


Gabadha la dhaha Madina ayaa ninkeeda wuxu geeriyooday iyada oo saddex bilood oo uur ah u leh. Kadib ayaa waxay bilaawday inay aawrtoodii ka kireeyso ganacsatada si ay iyada iyo hooyadeed ay uuga helaan noolal maalmeedkooda. Maalin ayaa waxay u anba-baxday dhanka Jabuuti si ay lacagtii kirada aawrta ay uga so qaadato gacnacsatadii. Balse, dib uma so noqon Madina. Maalma kadib aya waxa la helay hilbaheedi oo go'goay iyo dharkeedi oo jex-jeexan. Sida aan ka ogaanay dadka ayaa madina inta ay dhaxda sii socotay ayaa waxaa qabtay fooshi oo waxay awoodi kari waysay inay tolmadii jex-jeexdo si ay u umusho balse nasib daro Madina xanuunkii foosha ee qabtay waa ay u geeriyootay oo waraabaha ayey casha u noqotay.

## Qisadani waa dhacdo run ah oo ka dhacday Deegaanka Canfarta. Hadaba, waa maxay Gudniinka Gabdhaha?


Gudniinka Gabdhaha (FGM), Marka la eego qeexitaankii 1995 ee Hay'ada Caafimaadka Adduunka aya waxa uu ku lug leeyahay tallaabo kasta oo la qaado si gebi ahaan ama qayb ahaan looga saaro xubinta taranka ama qaybta gudaha ama dibadda ee xubinta taranka, taas oo ah isha dareenka ee xubinta taranka dumarka, ama in la baddalo muuqaalka dabiiciga ah ee xubinta taranka dumarka.

## Marxaladaha Gudniinka Gabdhaha


Gudniinka Gabdhaha wuu kala duwan yahay xaga noocyada iyo darnaanta; Sida laga soo xigtay warbixintii hay'ada Caafimaadka Adduunka ee 1995, waxay u qaybsan tahay saddex marxaladood oo waaweyn. Waxay kala yihiin:



**Marxalada Koowaad:** Caarada xubinta taranka  oo qayb ahaan ama gebi ahaanba la jaro,



**Marxalada labaad:** Marxalada labaad waa in qayb ahaan ama gebi ahaanba la jara dhammaan caarada xubinta taranka iyo faruuryaha yaryar.




**Marxalada Sadaxaad:** Gudniinka noocaan ah waxaa la sameeyaa iyada oo la jaro dhammaan ama qayb ka mid ah faruuryaha waaweyn oo ay ku jiraan kuwa lagu xusay noocyada koowaad iyo labaad, oo laga tago dalool yar oo kaadida iyo caadada ka baxaan oo kali ah. Gudniinka noocaan ah waxaa afka ingiriisiga loogu yeeraa Infibulations sidoo kale waxaa loogu yeeraa Gudniinka Fircooniga.

## Baaxadda iyo baahsanaanta gudniinka Gabdhaha

Sida ku cad daraasad la sameeyay 2008dii, ayaa dumarka dalkeenna ee da'dooda u dhexeysa 15-49 sano ayaa 65% la guday. Daraasaddan ayaa lagu sheegay in Deegaanka Canfarta oo ah 91% iyo deegaanka Soomaalida oo ah 82% ilaa 99% looga dhaqmo gudniinka gabdhaha.

## Ku dhaqanka gudniinka Gabdhaha



Qaabka Gudniinka gabdhaha ayaa ah mid kala du-duwan oo ku xiran nooca gudniinka, qofka gudayo, iyo waayo aragnimadiisa. Gabdhaha la gudayo ayaa waxa lagu fadhisiinayaa ganbdha ama dhagax ama sheey kale si loo gudo. Kadib ayaa si aan loo maqlin cabaadkeeda oo ay u arkin marki xubinkeeda la jar-jarayo ayaa waxaa xaga dhabarka ka istaagayo qof afka iyo indhaha u qabto, laba qofna garbaha ayeey ka istaagayaan si ay u kala qabtaan gacmaha iyo lugaha oo kadib ayaa naagta gudeyso ay hoos u foorarsaneysa oo ay gudeysaa. Xanuunka iyo rafaadka ka dhashay gudniinka awgiis, carruurtu waxay u horseedi kartaa suuxdin iyo daal.

## Qalabka wax lagu gudo

Dumarka wax guda waxay adeegsadaan mindiyo, maqas, makiinado, jajabka muraayadaha, iyo xataa dhagaxa ugu af badan. Iyada oo wax kabaabisa ah aan la isticmaleyn ayaa hal shey loo adeegsadaa in lagu gudo caruur fara badan. Waxaa kale oo la ogyahay in marka caruurta loo gudo nooca saddexaad in ay adeegsadaan cirbado iyo qodxo si ay u tolaan xubnaha taranka. Gobalada Canfarta ee dariska la ah Tigreega, Amxaarada, iyo Argoba, dhallaanka waxa la gudaa markay jiraan 8 maalmood, laakiin inta badan Deegaanka, gudniinka wuxu ka dhacdaa laga bilaabo afar sano illaa siddeed sano.

Sidaas darteed, Gabdhaha markay sii weynaadaan oo sii xoogaystaan, waxay noqdaan kuwo jidh ahaan iyo maskax ahaanba u dhaawacma halganka iyo dhaqdhaqaaqa lagaga hortagayo nooc kasta oo gudniin ah.

## Dhibaatooyinka uu horseedo gudniinka gabdhaha

Dhibaatooyinka uu horseedo gudniinnka gabdhaha ayaa waxa ay ku xirantahay da'da lagudayo, waaya-aragnimada cida wax gudeysa iyo nooca gudniinka ee ilmaha lo gudayo oo waxa ka dhalan karta dhibaatooyin dhaw iyo kuwa fog.

## Dhibaatooyinka dhaw

Maadaama caruurta la gudayo bilaa kabaabiso aya waxay dareemayaan xanuun saa'id ah oo waxay sameynayaan dhaq-dhaqaaq kadib waxa dhici karo dhiig bax  iyo suuxitaan.

Gudniinka Gabdhaha wuxuu dhaawac u geystaa kaadi mareenka iyo xubinta taranka, taasoo ka dhalata nooca iyo fiiqnaanta aaladda (qalabka) gudniinka, waya-aragnimada qofka wax gudayo iyo awoodda xaga aragtida indhaha ee ruuxa gudniinka fulinayo iwm.

Gudniinka waxaa lagu sameeyaa bilaa kabaabisa iyada oo la adeegsanayo qalab fiiqan oo aan nadaafad lahayn, kaas oo horseedi kara caabuqyo oo sidokale xiliga gudniinka ee cunuga dhaq-dhaqaaqayo aya waxa dhici karo jabka kala-goysyada la xiriira xubnaha.

Waxa kale oo ay halis weyn u yihiin HIV/AIDS iyo cudurrada kale ee la kala qaado.

## Dhibaatooyinka Fog-fog

Dhibaatooyinka ka dhasha xiliga guditaanka ee sida Kaadida oo la ceshan waayo iyo nabaro xilliga gudista ayaa sababi kara kaadida oo adkaata.

Madhalaysnimada, xanuunka caadada, iyo cillad galmo ayaa ah sababaha ugu badan ee uu u keena gabdhaha oo marka danba sababa xanuuno joogto ah.

Gudniinka iyo nabarrada ka dhashay gudniinka ayaa waxay caqabada ku noqotaa in xubinta taranku uu fidiso xilliga dhalmada, taasoo keenta foosha oo dheeraata. Sidaas darteed, ilmaha iyo hooyadu way dhimani karaan. Hooyooyinka nool waxay u badan yihiin inay yeeshaan fistula, taas oo dhaawici karta kaadi-mareenka iyo kaadi-haysta.

## Sababaha qaldan ee horseeda in uu sii jira Gudniinka Gabdhaha

### 1. Wuxuu yareeynayaa rabitaanka galmada dumarka oo wuxuu kordhiyaa tan ragga

Runtii gudniinka gabdhaha ama jaritaanka xubinka taranka wuxuu meesha ka saaraa dareenka dumarka oo waxa uu horseeda inay ka walaacaan dhibatooyinka ka dhasha. Balse, arinkani wax kordhin ah kuma kenayo dareenka raga oo taas badelkeeda, waxaa laga yaabaa in dhibka ay wadaagaan rag iyo dumarba, maadaama xubinta taranka la jar-jaray ay iyada iyo ninka labadaba u tahay xanuun xiliga galmada.

### 2. Gudniinka ayaa gabdhaha wuxuu ka dhigaa inay noqoto gabadh daggan

Fikiradda ah in gabdhaha aan la gudin ay akhlaaq la'aan noqon doono oo aan waliba nidaam lahayn waxay ka timaadaa waayo-aragnimo la'aan, ee ma aha mid ka timaadda dabeecadda aadanaha. Awoodda ay gabadhu u leedahay inay ilaaliso daahirnimadeeda iyo